

Jamhuuriyadda Soomaaliya



جمهورية الصومال

Maxkamadda Sare

محكمة العليا

President of Supreme Court

REF: MS/96/2014

14/10/2014

**KU: GUDDOOMIYAHA GOLAHA SHACABKA AHNA KU SIMAHA
MADAXWEYNAHA**

**UJEEDDO: FARA GELIN IYO KU TAKRIFAL AWOODEED OO UU KU
KACAY HAYAHA JAGADA XEERILAALIYA GUUD EE QARANKA.**

Mudane; Madaxweyne

Waxaan jeclahay inaan kula socdsiiyo nin golaha wasiirada u magacabeen xeerilaaliye oo lagu magacaabo Axmed Cali Daahir uu ku kacay falal aan ku habbooneyn inuu sameeyo nin xeerilaaliye sheeganaya, ninkan meel laga soo gamay aanagu garan meyno (Ethopia).

Wuxuu ku kacay arimahan soo socda:-

- 1) wuxuu ku dhawaaqay in aanu aqoonsanayn Golaha Adeegga Garsoorka kana mid ahayn garsoorka taasoo ka soo horjeeda Qod. 15 iyo 18 ee Xeerka Nidaamka Garsoorka No:3 oo soo baxay 3/6/1962 Qodobbadaasi oo sheegaaya in xeerilaalintu ka mid tahay garsoorka (Judiciary) sidaas darteed muu weydiisanba Golaha Adeegga Garsoorku inay ansixiyaan ee xoog ayuu ku furtay xafiiska xeerilaalinta.

2) Isagoo sheeganaya inuu yahay xeerilaaliye ayuu xukuno maxkamaddu gashay si aqoon darro ah ama jaahilnimo ah u faro geliyaa oo uu amrayaa in aanay waxba jirin xukunka maxkamaddu gaadhay taa soo aad ogtahay Mudane Madaxweyne in xilka uu hayaa aan awood u siineyn in xukun maxkamadeed oo ah Civel Case baabi'iyoo.

3) Xeerilaaliye ku xigeenno haysta digreeto madaxweyne iyo go'aannadii Golaha Adeegga Garsoorkaba uu shaqada ka joojiyo qaar kalena uu lacagtii ka joojiyo sida Dr.Mukhtaar Nuur Abuukar, isagoo ku doodaya markaa inaanu sharciyeysneyn, idacadahana ka sheegay waxaa jira garsoorayaal aan heysan digreeto madaxweyne.

4) Isagoo dad qoyskiisa ah oo aan sharciyaysanyn oo tiradooda lagu qiyaaso in ay dhan yihii 11 keenay xafiiska sida uu yahay Tukaan uu isagu leeyahay.

Madaxweyne sidaad ogtahayba Golaha Adeegga Garsoorka waxa uu awood buuxda u haystaa magacaabista, beddelaadda iyo dallacsiinta garsoorayaasha (fiiri qod. 109A iyo (6)(A).)

Golaha Adeegga Garsoorka waxa uu u soo jeeediyay Madaxwaynaha in garsoorayaasha la magacaabay tiraba laba jeer, laakin Madaxwaynuhu ma soo ogolaan iyadoo sharcigu sheegayo marka Golaha Adeegga Garsorku soo jeediyo uu ansixiyo. Aad baan u hubaa in aad aqoon fiican iyo khibradba u leedahay nidaamkeena Dawliga ah.

Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Dalka

Caydiid C/laahi Iikayana

